



XAFIISKA XOGAHAYAHA

Go'aan Lr: 1127 /2023

Date: 4th November 2023

Go'aan Guddi Fulneed:

Shir ay isugu yimaadeen guddida fulinta caasimadda Hargeysa maanta oo ay bishu tahay 4th November 2023 shir gudoomiyena ka ahaa Ku Xigeenka Duqa Caasimadda JSL (Khadar Axmed Cumar)(Khadar Nuur) Kuna saabsanayd Cancell'gareen fayl (Tirtirid), Dood iyo falan qayn dheer ka dib.

Wuxuu Go'aansaday:-

Markuu Arkay:-

Sharciiga Wasaaradda Arrimaha Gudaha Ismaamulka Gobalada iyo Degmooyinka JSL.

Markuu Arkay:-

Tixraaca warqada ku suntan DHH/WHDDHC/130/2023 ee 10th October 2023 kana soo baxday warbixin laba file, kana soo baxday Agaasimaha Waaxda hantidhawarka Gudaha DHH.

Markuu Arkay:-

Tixraaca warqada ku suntan DHH/DMM/592/2023 ee 12th September 2023, ujeedadeeduna tahay war-bixin laba file, kana soo baxday Gudoomiyaha Degmadda M/mooge Hargaysa.

Markuu Ogaaday:-

In dhulkaas leh TR 14644 kuna qoran yahay Maxamed Yuusuf Cali cabirkuna yahay 12x18m = 216m uu yahay dhul wado ah oo laga iibiyey.

Markuu Xaqiiqsaday:-

Inay lagama maarman tahay in cancel gareeyo faylkaasi wadada noqday.

Markuu Tixgaliyay:-

Tallada masuuliyiinta hawshani khusayso

Gudiga Fulintu:-

Kadib markuu arkay dhamaan asbaabahaasi sare ku xusan guddida fulintu wuxuu go'aansaday in la cancell gareeyo (Tirtirid) faylka TR'kiisu yahay 14644 kuna qoran yahay muwaadin (Cabdi Yuusuf Cali) cabirkiisuna yahay 12x18m dhulkaasina la soo cadeeyey inuu wado yahay.

Shaqo wacan

(Siciid Nuur Aw Jaamac)
Xoghayaha Fulinta D/hoose Hargaysa
Xoghayaha Golaha Degaanka Hargeysa.

(Khadar Axmed Cumar)(Khadar Nuur)
Ku Xigeenka Duqa Caasimada ahna
Gud/Xigeenka Golaha Deegaan Harg

Email: Executivesecretary@dhhgov.org Hargeysa Tell: +(252)634211829 + 0634408647

Republic of Somaliland
Hargeisa Municipality



Jamhuuriyada Soomaaliland
Dawlada Hoose Ee Hargaysa

WAAXDA HANTI DHAWRKA GUDAHA

Date 10th Oct 2023

Ref: DHH/WHDHG/ 530 /2023

Ku: - Xoghayha Fulinta D/Hoose

Og: - Ku Xigeenka Duqa Casimada

Og: - Duqa Caasimada

Uj: - Warbixin Laba File

Mudane Xog-haye

=Xarunta=

=Xarunta=

=Xarunta=

Tixraaca amarka aad jaldiga warqada dusheeda ku soo qortay u jeedadeeduna ay aheyd ka soo talo bixi, mudane xogahaye waxa halkan kugu soo gudbinayaa warbixinta labada file ee laga kala iibiyey labada muwaadin ee kala ah **A/qani Mohamed Ibraahim** iyo **Abdi Yusuf Ali** kaas oo uu ka wada libiyey dhulka muwaadinka magaciisu yahay **Abdilaahi Mooge Cigaal** cabir isku mid ah mid kastaba uu yahay (12m x 18m). Inta ka dib dhulkii laga libiyey muwaadinka magaciisu yahay **Abdi Yusuf Ali** waxa uu noqday **dhul wado** waxaana loo celiyey lacagtii uu ku libsaday dhulka maadaama oo ay noqotay goobtu wado qorshahana ayna Waafaqsaneyn file-kiina waxa la wareegay muwadiinkii markii hore dhulkan iibiyey ee magaciisa xaga sare ku soo xusay.

Sidaas darteed mudane xog-haye waa in la **Cancel** gareeya file-kan wadada noqday maadaama oo uu haysto muwaadinkii ku qornaa, diidayna in uu siiyo muwadiinkii kale ee uu badhka kale ka iibiyey oo uu ahaa magaciisu **A/qani Mohamed Ibraahim** si uu file-kiisu ugu socdo.

Allaa Mahad Leh

Abdillaahi Mahdi Jamac
Agg. Waaxda Hanti Dhawrka Gudaha

Hargeisa/Somaliland Mobile: +252 63 4185752 / +252 63 4734739



Handwritten signature: Wana Sam



XARUNTA DEGMADA M.MOOG

REF:DHH/DMM 592/2023

DATE:12 Sep. 2023.

KU: xoghayaha fulinta d/hoose harg

OG: Wakiilka Golaha Deegaanka Degmada harg

OG: Ku-xigeenka Duqa Caasimadda harg

OG: Duqa Caasimadda harg

Ujeedo: Warbixin labo file

Mudane xoghaye ,waxaan halkan kuugu soo gudbinaynaa warbaxinta labada fayl ee ay ku kala qoran yihiin muwadiniinta kala ah c/qani maxamed ibraahim TR faylkiisuna yahay 39708 halka muwaadinka kalana yahay maxamed yuusuf cali TR faylkiisuna yahay 14644 hadaba mudane xoghaye labadan muwaadin waxa dhul waddo ah ka iibiyey muwaadinka magaciisu yahay c/laahi mooge cigaal. Halka uu c/qani maxamed ka iibiyey dhul qorshaha waafaqsan cabirkiisuna yahay 12*18m 216mq halka uu cabdi yuusuf cali ka iibiyey 12*18m 216mq oo waddo ah .

Iska kadib waxa is qabsaday muwaadinka magaciisa la yidhaa cabdi yuusuf cali oo ah iibsade iyo muwaadinka ciise la yidhaa oo c/laahi mooge cigaal ka iibiyey, markuu iibsaduho ogaaday in dhulka laga iibiyey yahay waddo is qabsi kadib iibiyuhu wuu celiyey wadadii uu iibiyay lacagteedii islamrkaana faylkii waxa la wareegay iibiyaha dhulka faylkaas oo ka baxay dhulkii uu lahaa muwaadinka kale ee magaciisu yahay c/qani maxamed ibraahi

Sidaas darteed, Mudane xoghaye madaama oo muwaadinkii faylkan samaystay lacagtiisii loo caliyey halka u faylka ka samaysatayna ay ahayad meel qofkala leeyahay halka isaga laga iibiyayna tahay waddo . hadaba waxaan soo jeedinayna in faylka lakansal gareeyo.

Abdirahmaan Mohamed ismail
Gudoomiyaha Degmada M.Mooge D/HOOS

